Warbixin Guud

Sinnaan la'aan qoto dheer oo ka jirta go'aamiyeyaasha bulshada ee caafimaadka

Horaantii bishii Abriil 2020, Hoggaamiyaasha jaaliyadda Chelsea, Massachusetts waxay fahmeen in magaaladda ay waxyeelaysay SARS-CoV-2 (COVID-19), si aysan wax u yeelin dalka intiisa kale, Bilihii ugu horeeyey ee safmarka cudurka, saamiga boqolkiiba caabuqa cudurka ee Chelsea's wuxuu ahaa (56.93 per 10,000 residents) wuxuu ka mid ahaa kuwa dalka ugu sareeya. Maadaama saamiga caabuqu uu kor u kacay, waxay cilmibaadheyaasha dalku codsadeen inay ogaadaan inay saameynta uu ku leeyahay jaaliyada Chelsea in muunad dhiigga ah laga qaado iyo biyaha wasakheysan. Taas waxaan uga dan leenahay inaan fahano sida ay wax uga dhacayaan Chelsea. Hadana, GreenRoots iyo hoggaamiyaasha ama madaxda jaaliyada kale ku ogaadeen sababta ay jaaliyadeed hormuudka u ahayd ay taasi u saameysay: taas ay bulshada caafimaadkeenna waxyaabaha kala duwanaansha bulshadeed ee ka jirta.

Peter Slavin, MD, Massachusetts General Hospital Former President

'Waxaan si aad ah ugu dhiirigelinayaa una mahadceliyaa dadka deegaanka Chelea, sida ay u maareeyeen cudurkaas safmarka ah. Laakiin markii ay caddaatay in Chelesea ay noqotay xarunta safmarka cudurka Covid-19, waxaa xaqiiqo ahaatay in adkaysi oo keliya aan cudurka lagaga hortagi karin. Qoddobo kale oo ay ka mid yihiin dhibaatooyinka guriyeynta, shaqada, cuntada, iyo jinsiga ayaa caafimaadka saameyn weyn ku leh Waxaan ku rajoweynahay inaan wadajir haddii aan u shaqeyno aan fayadhowrka caafimaadka jaaliyadeenna sugi doono. Haddii aan qoddobadaas wax ka qabano iyo dhibaatooyinka faraqa caafimaad ee ay keenayaan'

Laba toddobaad ka hor, waxaa bannaan- bax wada qabtay GreenRoots, ha'ayadaha bulshada hormuudka u ah iyo ha'ayadaha kale ee jaarka la ah iyo madadxa magaaladda si loo abuuro Chelsea Pandemic Response Team Waxaan si wadajir uga shaqeynay, una ololeynay sidii loo heli ahaa adeegyada daryeelka caafimaadka, dhaqaale, nidaamyo lagu taageero iyo xaalado marxaladahas si deg deg ah looga jawaab celiyo. Dhammaan shaqooyinkaas waa kuwo socda, maantana bulshada dhexdeedana laga dareemi karo. Hawlahaas aan sida wadajirka ugu qabanay jaaliyadeenna waxaa lagu ogaaday inay fahmaan arrimaha saameynta ku leh safmarka cudurka.

GreenRoots waxay soo bandhigeen sheeko ku saabsan Chelsea - siyaabaha iyo sababaha arrimaha caafimaadku u horseedeen saameynta ay ku sheegeen wanaaga iyo xumaanta COVID-19. Macluumaadku wuxuu muujinayaa ku kala badnaanta iyo arrimaha bulshada ee horseeda waxyeelada COVID-19, taas oo maalinta saameysa bulshada. Warbixintu waxay soo bandhigaysaa qoddobada saameeyey caafimaadka bulshada COVID intuusan dhicinka hor, taas oo bulshada ka dhigaysa kuwo cudurka u nuglaada, sida hawada wasakhowday ee nitrogen ee sababta cudurada ay ka mid yihiin neefta, wadnaha, sonkorta iyo macaanka; yaraanta cuntada iyo bulshada oo aan la talaalin. Warbixintu waxay kale oo tilmaameysaa qoddobada xanuunka deg deggaah keena, sida 10% la degan yahay guryo dadku ku badan yihiin. 80% shaqaalaha Chelsea waxay yihiin muhim. Tobanaan kun oo dadka muhaajiriinta ah kama diiwaangashana barnaamijyada adeegga caafimaadka loogu fidinayo, sababta oo ah cabsi ay ka qabaan ha'ayada socaalku. Macluumaadkan iyo waayo-aragnimada nololeed ee aanu u leenahay cudurka COVID-19. Waxaan kale oo sheegaynaa siyaabaha bulsho iyo dhaqaale uu ku leeyahay safmarka cudurka ee Chelsea.

Warbixintu waxay tilmaameysaa sababaha ay Chelsea ugu nuglaatay cudurka COVID-19, waxaana ka mid ah deegaanka, cabsida la xidhiidha ha'ayada socdaalka, arrimaha jinsiyada, tayada hawada, arrimaha caafimaadka, nooca hawada, kala duwanaanshaha caafimaadka, deganaanshaha la'aanta guriyeynta iyo cunto la'aanta, Cudurada halista ah ee horey u jirey. Warbixintanu waxay fahan inaga siinaysaa sababaha Chelesea ay u noqotay meesha uu cufurka COVID-19 ugu hor dhacay, uguna khatarsanaa. waxay kale oo soo jeedinaysaa tallooyin mustaqbalka lagaga hortego masiibada bani'aadamnimo ee haysata.

Nidaamyada jira (systems) waa in ku shaqeeyaan muhiimadda ay leedahay kala horaynta (prioritize) baahida oo ku salaysan rasaynta hab nololeedka bulshada iyada laga eegayo dhinaca maashka soo gala. waa inaynu ku shaqayno inagoo fulinayna go'amada siyaasadda iyo maalgalinta u ah,balse aan wax yeello u keenaynin, caafimaadka fayo qabka bulshadeena degganaha ah; waa in aynu wax ka qabano dhibaatooyinka dhinaca caafimaadka bulshada. Uruurinta daraasaadaha jira & xogaha ku saabsan dhibaatooyinka caafimaadka bulshada Chalsea waxay si joogta ah u sheegeenwa ay masuuliyiinta Chalsea muddo dheer horayba u ogaayeen: Safka hore ee cadaaaladda bulshada bay'adeena kala duwan waxa dibindaabyo weyn u gaystay xaaladda caafimaadka bulshadaiyo sibedelka cimilada ee degdeg ah. Waxaynu ognahay in la joogo xigii talaaabo qaadka . waxaynu ubaahanahay in aynu diiradda saarno kobcinta & wax ka qabashada dhibaatooyinka bulshada ee soo jireenka ah lana xidhiidha caafimaadka si aynu uga gaashaamano musiibada mustaqbalka. Sidaas daraadeed , waxa warbixinta & qayb kasta oo ka mida ah documentiga tix-raacda daraasaadda ku jira tallo bixin qorshayaal siyaasadeed iyo maal-gelin oo ay Green roots aaminsantahay inay ku haboonyihiin wax ka qabashada dhibaatooyinka marxaladaha aynu hadda ku sugannahay ina dhaxalsiisay.

Muhimada cilmi-baadhista waxaa ku jira:

1. Arrimaha bulsho ee caafimaadka Chelsea waxay qeyb ka qaateen xanuunka cudurka COVID-19. Kaalintaas waxaa loo qeybin karaa laba nooc Saameyn muddo dheer qaata oo dadka deegaanka xanuun xun ku reebta iyo caafimaad liita samafmarka ka hor iyo saameyn dhakhso oo uu cudurku sii faafo, kedibna adeeg la raadsado marka uu cudurka COVID-19 dillaaco.
2. Dadka degan Chelsea waxay soo galeen safamarka xaaladaha caafimaadka oo horey u jirey, kaas oo ka dhigay kuwo shakhsiyaadka u noqdeen kuwo u nugul caabuqa COVID-19. Hawada xun ee muddada dheer ka jirtey dibedda (ee nitrogen saamigeedu sareeyo) iyo hawo xumada liidata ee gudaha (ee guryaha duugoobey) waxay saameysay oo cudurada xanuun ayey u keentay. Waxaa kaloo dadka degan talaal la'aantu xanuun u keentay bulshada.
3. Chelsea dadka guryaha ku nool oo badan ayaan sababeya inuu dulanku (virus) si dakhso ah u faafo. 10% (boqolkiiba10) ayaa dadka ku nool guryaha Chelsea ay badan yihiin marka la babardhigo 2% dalka intiisa kale. Dhaqaale yarida iyo adeeg caafimaad xumada ayaa si weyn u saameynaysa caafimaad darida dadka deegaanka. Dhaqaale yaridaas ayaa keenaysa in qoysasku ay ku khasbanaadaan saddex laab guryaha degan sii bataan.
4. Kala duwanaanshaha jinsiyadaha, xaalada socdaalka iyo kala duwanaanshaha luuqadaha ayaakaalin weyn ka qaatay. Dadka Laatiino iyo madowgu ee ku nool Chelsea waa kuwa ugu daran ee 19.79% cudurka COVID-19 uu dhibaateeyey. 45% dadka ku dhashay waddamada waxay ka cabsaneyaa arrimaha socdaalka taas oo u sababtay inay adeegga caaffimaadka raadsadaan.
5. Sido oo kale ,shaqadu (employment) door weyn ayay iyana leedahay . Boqolkiiba (80) shaqaalaha chelse waxay noqdeen kuwo muhiimad aasaasi ah leh,taas oo lagama maarmaan ka dhigtay inay shaqadoodu sii wataan maalmaha hore ee helidda adeegyada ka hortaga iyo aqoontuba ay xadidanyihiin. Warbixinta daraasaadani waxay xaqiijinaysaa inay lagama maarmaan tahay in si wada jir miisaanka la saaaro kala horaynta muhiimadda adeegyada caafimaadka iyo fayo qabka bulshada degganaha Chalsea & guud ahaan dalka oo dhan ,adeegyadaas oo ah kuwo horay u sii jiray.

Ugu horaynba , waxaan si adag u aaminsanahay in si wax looga qabto sinnaan la'aanta caafimaadka ee soo wajahday dadka madowga ah ee dhakhligoodu hooseeyo ,waa in maal-gelin lagu ballaadhan la sameeyo si xal loogu helo dhibaatooyinka caafimaadka . Waxaa taas wehliya ,waa in la sii xoojiyo siyaasadihii ka hor tagga ee horay u ,sii jiray islamarkaana siyaasado cusub la abuuro si looga hor tago wax yeello si guud bulshada u taabata sida Chalsea.

Waxaa kale oo aan rumaysanahay:

1. waxaynu wada fiicanahay wada jirkeena. Isbedal dhab ah wuxuu dhashaa marka bulshada kala duwan la wada dhagaysto . waa in la taageero islamarkana kor loo qaado dadaalka wada jirka ah ee wax ka qabashada dhibaatooyinka qaybaha iyo caqabadaha kala duwan. Waa indeggenayaashu noqdaan xudunta khibradda .

2. waa in la cayimo (identify) islamarkaana abaaro xalka cadaadska baahsan ee xidida aastay iyo sinnaan la'aanta bulshada. Cunsuriyadda ,nacaybka nujriminta iyo caqabadha luuqadda la xidhiidha ma noqon karaan xoogga dhaqaajiya curinta fulinta siyaasadda arrimaha bulshada.

3. Bay'ada nugul ee Chalsea ilaalin &iyo horumarin bay u baahantahay . Waa in aynu mudnaanta koobaad siino ballaadhinta fursadaha caraagirinta , iyo beerista &ilaalinta dhirta .

4. waa in la sugo xaqiijinta in ay dadku helaan hoy amnigiisu suganyahay. Waa in lagu dadaalo islamarkaana la fuliyo ka hortagidda barakaca ,ilaalinta iyo ballaadhinta fursadaha ay dadku heli karaan guryo hoyah oo qiimahoodu sahlanyahay. Ilaalinta caafimaadka bulshada.

5. Waa in wax laga qabto farqiga caafimaadka bulshada ee xiliga dhaw iyo xiliga fog. Waa in dadku si toos ah u heli karaan adeeg caafimaaad, cunto, iyo xota caafimaadka oo lagu kalsoonyahay oo luuqado kala duwan lagu baahiyo . Waa in dadaalka xiliga fog ee lagula tacaalayo wax ka qabashada xanuunada isbiirsaday (comorbidites) uu noqdo mid baaxad weyn dhinacyo badan saameeya (comprehensive) , bulshada oo dhan gaadha , islamarkaana xaliya dhibaatooyinka bulshada ee wajiyada badan ee arbixinta lagu xusay .

Fiiro gaar ah : Fadlan ogow in astaamaha muujinaya dhibaatooyinka kale ee bulshada la darsay(sida xanuunada dhimirka , daryeelka carruurta , isticmaalka walxo , xad gudubyada jinsiga la xidhiidha ,iyo kuwo kalaba) ay door weyn ka qaateen dhibaatooyinka ay bulshadu dhadhamisay mudadii cudurka saf-mareenka ahi jiray hase yeeshee si muuqata looguma xusin.

HADDA WAA WAKHTIGII WAX LA QABAN LAA